Park Nicollet®
HealthPartners®

Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale

Financial Assistance Policy—Somali

Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet kaasi oo ay kujiraan Methodist Hospital, Park Nicollet Clinic iyo TRIA Orthopaedic Center, waxa ka go'an siinta daryeel caafimaad oo tayo leh bukaanadayada, oo ay kujiraan kuwau baahan kaalmo dhaqaale. Sidaa darteed, Siyaasaddayada Kaalmada Dhaqaale (oo loo tixraacayo halkan kadib "Siyaasad") waxa heli kara bukaano iyada oo lagu salaynayo awood la'aanta iska bixinta lacagta gurmadka iyo daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah ee kale. Siyaasaddayda waxay u jirta inay bixiso caawimo dhacdo; Loolama jeedo in la bixiyo daryeel muddo dheer oo bilaash ah ama qiime-dhimis lagu sameeyey. Bukaanadu waa inay dib-u-dalbadaan kaalmada booqasho kasta ee Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet. Siyaasaddaydu waxay dhigaysaa oo caddaynaysaa miqyaaska mutaysiga, sida aanu u xisaabino qiime-dhimista, sida loo dalbado kaalmo dhaqaale, iyo siyaasaddayda la xidhiidha daryeelka caafimaadka gurmadka.

Bukaanadu waxay ka heli karaan nuqul bilaash ah oo ah Siyaasaddan iyo foomka dalabka kaalmada dhaqaale Methodist Hospital, South Admitting, Suite 1-615, Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 g.h. - 4:30 g.d. Macluumaad ama su'aalo dheeraad ah oo kusaabsan habka dalabka, ama sida loogu codsado nuqullo boosta, bukaanadu waxay la xidhiidhi karaan Waaxdayada Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka **952-993-7672** (cinwaanka: FA/5050, 3800 Park Nicollet Blvd, St. Louis Park, MN 55416). Khayraadka dheeraadka ah ee soo socdaa waxa laga heli karaa **www.parknicollet.com/FA:**

- Nuqullo bilaash ah oo ah Siyaasaddan foomka dalabka kaalmada dhaqaale
- Nuqullo bilaash ah oo ah Siyaasaddan foomka dalabka kaalmada dhaqaale oo Ingiriisi, Isbaanshi, Soomaali, iyo Fiitnaamiis ah

MIQYAASKA MUTAYSIGA

Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet waxay leedahay miqyaaska mutaysiga ee soo socda si bukaanadu u helaan gurmad qiime-dhimis lagu sameeyey iyo daryeel caafimaad ahaan daruuri ah:

1. Bukaanku waa inuu yahay deggane Minnesota (ugu yaraan 30 maalmood kahor helista adeegga) mandaqadda adeegga Cusbitaalka sababo aan la xidhiidhan caafimaadkooda dartii ama baahida daryeel gurmad.

   A. Adeegyada ka baxsan waxa kamid ah adeegyada xulasho (aan caafimaad ahaan ahayn daruudi ama adeegyada isqurxinta), iyo sidoo kale baaqiyada ay tahay inay bixiso caymisku, sida Medicare, Medicaid, automobile, magdhawga shaqaalaha ama daynta caymiska. Qalabka kiro ee Waxsoosaarka Daryeelka Caafimaadka iyo agabka ostomy sidoo kale waa ka baxsan yihiin.

2. Bukaanku waa inuu bixiyo caddayn in loo diiday dheefaha dawladda, sida Kaalmada Dhaqaale.

   A. Caddayn habboon ee dakhliga waa in la bixiyo taasi oo ay kujirto nuqul ah cashuur celinta bukaanka ugu dhawayd, ee Federal 1040 iyo warqadda dheefta Sooshiyaal Sikiyuuriti, dheefaha shaqo la'aanta ama naafada.

   B. Warqadda diidmada dheefaha ee dawladda ayaa sidoo kale la rabi karaa.

3. Bukaanku waa inuu si buuxda u dhammeeyo wixii kaalmo dawladeed ee jirta iyo wixii dheefo caymiska caafimaadka ee jira.Bukaanku waa inuu buuxiyo Dalabka Kaalmada Dhaqaale ee Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet oo uu dhiibo dhammaan dokumentiyada la codsaday.

4. Bukaanku wuxuu ka masuul noqon doonaa baaqiga iska-bixinta u horreeya ee $200 oo ka socda adeegyada uu mutaystay ee xarunta Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet.

5. Bixin waaga $200 ee horreeya waxay keeni kartaa in la diido Dalabyada Kaalmada Dhaqaale ee mustaqbalka.

6. Mutaysiga bukaanka ee daryeelka qiime-dhimista lagu sameeyey waxay kusalaysnaan dakhliga qoyska, xajmiga qoyska, iyo hantida sida soo socota:

   A. Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet waxay siisaa kaalmo 100% (kadib $200 ee u horreeya) dhammaan bukaanada dakhliga qoyskoodu kayar yahay ama la mid yahay 275% Heerka Saboolnimada Fadaraalka.

   B. Bukaanadu waxa dhici karta inay mutaystaan kaalmada 50-90% (kadib $200 ee u horreeya) marka dakhliga qoysaskoodu u dhexeeya 275% iyo 385% Heerka Saboolnimada Fadaraalka, iyada oo heerka qiime-dhimista lagu go'aaminayo dakhliga qoyska bukaanku inta uu ka yahay boqolkiiba Heerka Saboolnimada Fadaraalka.

Xajmiga Qoyska	Heerka Saboolnimada Fadaraalka 2017	275% Heerka Saboolnimada Fadaraalka	385% Heerka Saboolnimada Fadaraalka
1	$12,060	$33,165	$46,431
2	$16,240	$44,660	$62,524
3	$20,420	$56,155	$78,617
4	$24,600	$67,650	$94,710
5	$28,780	$79,145	$110,803
6	$32,960	$90,640	$126,896
7	$37,140	$102,135	$142,989
8	$41,320	$113,630	$159,082

   C. Bukaanada aan caysanayn adeegyada cusbitaalka iyo kuwa dakhliga qoyskoodu uu kayar yahay $125,000 kuwaasi oona dalbaday barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet waxay mutaysteen qiime-dhimis.

      a. Qiime-dhimista waxa la raacaya heshiiskeena aan la galnay Xeer-ilaaliyaha Guud ee Minnesota, sida hoos ku cad.Xaaladahan, bukaanka looga baahan maayo inuu bixiyo lacagta qofku iska bixiyo ee ugu horraysa ee $200 si uu ugu qalmo adeegyada cusbitaalka haddii qiime-dhimistu keenayso baaqiga dammiinku ka yar yahay $200.

   D. Bukaanadu waa inay dhiibaan dokumentiyada hantida sida lacagta cad iyo hantida kale ee lacag cad u-dhawaha ah si dalabka dib loogu eego. Hantida lacag cad u-dhawaha ah waxa kamid ah lacagta hantida taasi oo si sahlan loogu rogi karo lacag cad, sida xisaabaha dhigaalka iyo jeegga, istogga, boondhka, shahaadooyinka dhigaalka, lacagta sannadlayda iyo xisaabaha suuqa lacagta. Hantida lacag cad u-dhawaha ah ee ka badan $20,000 waxa lagu daraa xisaabinta dakhliga. Si loo kaalmeeyo qiimaynta kaalmada dhaqaale ee dalbadayaasha leh dhaqaale ka badan waxa ku qoran Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet , miqyaaska soo socda ayaa la eegi:

      a. Hantida lacag cad u-dhawaha ah (sida sare lagu qeexay) oo ka badan $20,000 waxa loo tixgalin si la mid ah sida dakhliga qoyska xisaabintan. Masuuliyadda qofku iska bixinayo waxa lagu dabooli 25% kamid ah dakhliga sannadkii hore iyo hantida mutaysiga ee wakhtiga.

7. Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet waxa dhici karta inay si mala-awaal ah u go'aamiyaan in bukaan uu mutaystay kaalmada dhaqaale oo kusalaysan go'aamin mutaysi oo hore. Go'aaminta mala-awaalka ah wuxuu kusalaysnaan karaa macluumaadka Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet ay hayso ama mar dambe ay hesho. Haddii bukaan si mala-awaal ah loo go'aamiyo inuu mutaystay wax kayar kaalmada ugu badan, Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet waxay ogaysiin bukaanka iyada oo eegaysa go'aaminta mala-awaalka ah, sida loo dalbado kaalmo badan, waxay siin bukaanka wakhti ku filan inuu dalbado kaalmo badan, oo uu go'aan ka qaato marka dalab dhammaystiran oo kaalmo badan la helo.

8. Rugaha Caafimaadka ee Park Nicollet waxay ka qaybqaataan barnaamijka taageeraada dhaqaalaha Senior Partners Care ee dadka qaata Medicare. Wixii macluumaad ah ee barnaamijkan iyo shuruudaha uqalmanaantiisa, kala xiriir Senior Partners Care lambarka 952-541-1019 ama booqo websayda http://seniorcommunity.org/programs/senior-partners-care/.

SIDA LOO DALBADO KAALMO DHAQAALE

1. Bukaanadu waa inay dhammaystiraan Dalab Kaalmo Dhaqaale oo ay bixiyaan caddayn dakhli oo habboon iyaga oo soo qaadaya ama boosta u soo dhigaya: Park Nicollet Health Services, Patient Financial Services - FA/5050, 3800 Park Nicollet Blvd, St. Louis Park, MN 55416.

2. Bukaanadu sidoo kale waxa dhici karta inay fakas ugu diraan dalabyada dhammaystiran iyo caddaynta dakhli oo habboon Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka 952-993-2770.

3. Caddaynta dakhli oo habboon waxa kamid ah nuqul cashuur celinta bukaanka ugu dhawayd, ee Federal 1040 iyo warqadda dheefta Sooshiyaal Sikiyuuriti, dheefaha shaqo la'aanta ama naafada. Haddii dakhliga bukaanku isbeddelay ilaa cashuur celinta Fadaraalka ee u dambaysay, waraaqaha mushaharka wakhtiga ee 3 bilood ayaa la codsan karaa.

4. Dalabka waxa laga daabacan karaa websaytkayaga parknicollet.com/FA ama bukaanadu waxay ka heli karaan nuqul haddii ay wacaan Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka 952-993-7672. Waxaan shaqaynaa Isniinta – Jimcaha laga bilaabo 8 gh – 6 gd. Dalabka waxa lagu heli karaa Ingiriisi, Isbaanish, Soomaali iyo Fiitnaamiis.

5. Shaqaale qaabilsan Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ayaa jira si ay u caawiyaan bukaanada buuxinta dalabka marka taleefanka ama marka bukaanadu u yimaadaan. Kaalmo qofku xaadir yahay ayaa sidoo kale jirta dalbashada barnaamijyada dawladda sida Kaalmada Caafimaad. Bukaanadu sidoo kale waxa dhici karta inay la xidhiidhaan Waaxda Adeegyada Aadanaha ee degmada ay deggan yihiin ama wici karaan MNsure 1-855-366-7873.

Bukaanadu waxa dhici karta inay la xidhiidhaan Adeegyada Dhaqaalaha bukaanka 952-993-7672 wixii su'aalo kusaabsan dalabka ama inay helaan goob halkaasi oo wakiil uu jiro si uu qofka toos ula kulmo.

XISAABINTA KAALMADA DHAQAALE

Adeegyada Caafimaadka Park Nicollet waxay u xisaabin kartaa heerka kaalmada dhaqaale ee bukaanka saddex qaab:

1. Qaansheegaha Methodist Hospital, bukaanka mutaystay kaalmada dhaqaale lagu dallici maayo lacag ka badan ta sida qaalibka ah lagu dallacayey bukaanka uu caymiyey Methodist Hospital marka la eego daryeelka gurmadka ah ama caafimaad ahaan daruuriga ah ee kale. Wakhtiga la joogo, Methodist Hospital wuxuu ku go'aamiyaa lacagta sida qaalibka ah lagu dallaco isaga oo ku dhufanaya khidmadaha guud ee wixii daryeelka gurmadka ah ama caafimaad ahaan daruuriga ah ee kale ee la siiyey bukaan mutaystay kaalmada dhaqaale **56.62%**.

   Tusaale ahaan, haddii khidmadaha guud ee daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah waa $10,000, Methodist ku dallici mayso bukaanada FAP-mutaystay wax kabadan $5,662 (10,000 X 56.62%), taasi oo ah qiime-dhimis ah 43.38%.

Methodist Hospital wuxuu u xisaabiyaa boqollaydan isaga oo u qaybinaya wadarta sheegashooyinkiisa oo dhan ee daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah ee ay oggolaadeen caymiyayaasha caafimaadku inta lagu jiro muddo 12 bilood ah wadarta khidmadaha guud ee la socda sheegashooyinkaas. Xisaabintan, oo sidoo kale loo yaqaan “Look-Back Method, Methodist Hospital si sannadle ah ayuu u xisaabiyaa.

2. Qaansheegaha Methodist Hospital, *haddii ay ka fiican yihiin qiime-dhimista lacagta sida qaalibka ah lagu dallaco ee sare lagu sheegay* , bukaanada Minnesota ee aan caynsanayn waxa dhici karta inay mutaystaan qiime-dhimis marka la eego heshiiska Methodist Hospital kula jirto Xeer-ilaalyaha Guud ee Minnesota, oo lagu xisaabiyey iyada oo la adeegsanayo qiime-dhimis boqolkiiba oo la mid ah ka loo adeegsan lahaa bixiyaha ganacsi ee dakhliga u sarreeya ee Methodist Hospital. Wakhtiga la joogo, qiime-dhimista Xeer-ilaalyaha Guud ee Minnesota waxa lagu go’aamiyaa in lagu dhufto khidmadaha guud ee daryeelka caafimaad ahaan daruuriga ah ee lagu helay Methodist Hospital **70.7%**, taasi oo ah 29.3% qiime-dhimis.

3. Qaansheegaha Park Nicollet Clinic, iyo inta hadhay qaansheegta bukaanka Methodist Hospital kadib qiime-dhimista lagu sheegay #1 iyo #2 ee qaybtan waa la qaataa, bukaanadu waxa dhici karta inay mutaystaan qiime-dhimis kusalaysan dakhliga qoyska, xajmiga qoyska iyo hantida sida ku cad #6 ee hoos timaad MIQYAASKA MUTAYSIGA.

LIISKA BIXIYAYAASHA CUSBITAALKA

Methodist Hospital waxa laga rabaa inuu taxo bixiyayaasha oo dhan, oo aanu kujirin Methodist Hospital laftiisu, kuwaasi oo ka bixiyaha daryeelka gurmadka ama caafimaad ahaan daruuriga ah ee kale Methodist Hospital oo uu cayimo bixiyayaasha ay daboosho Siyaasadda Kaalmada Dhaqaaluhu iyo kuwa ayna daboolin. Liiskan bixiyayaasha waxa lagu hayaa dokumenti gaar ah. Bukaanadu waxay ku arki karaan dokumentigan onlayn iyaga oo booqanaya parknicollet.com/FA ama iyaga oo ka codsada nuqul warqad ah iyaga oo la xidhiidhaya Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka.

SIYAASADDA DARYEELKA CAAFIMAAD EE GURMADKA

Methodist Hospital wuxuu siiaa daryeel bukaanada, bilaa takoor, xaaladaha caafimaad ee gurmadka ah iyada oonu eegin awooddooda ay lacagta iskaga bixin karaan ama mutaysigooda kaalmada dhaqaale. Methodist Hospital wuxuu mamnuucay wixii tallaabo ah ee uu bukaanada kaga niyadjabinayo inay raadsadaan daryeel caafimaad oo gurmad ah. Tusaalayaal dhaqanka la mamnuucay waxa kamid ah: shaqaale ama wakiil Methodist Hospital oo dalbaya in bukaanada waaxda gurmadku ay lacagta bixiyaan kahor intayna helin daawayn daryeelka caafimaad ee gurmadka, ama oggolaanshaha hawlaha dayn ururinta oo farogalinaya siinta daryeelka caafimaad ee gurmadka ah.

Methodist Hospital wuxuu ku dhaqmi doonaa dhammaan shuruudaha khuseeya Xeerka Daawaynta Caafimaad ee Gurmadka ah iyo Shaqaalaha, oo ay kujirto bixinta baadhitaanada caafimaad, daawaynta dejinta, iyo u gudbinta ama u wareejinta bukaan xarun kale marka ay habboon tahay. Methodist Hospital wuxuu bixin doonaa dhammaan adeegyada gurmadka isaga oo raacaya xaaladaha CMS ee kaqaybqaadasho.

SIYAASADDA QAANSHEEG DIRIS GAAR AH IYO LACAG URURINTA

Tallaabooyinka uu Cusbitaalku uu qaadi karo marka ay dhacdo inaan lacag la bixin waxa lagu sharxaa Siyaasadda Qaansheeg Diris Gaar ah iyo Lacag Ururinta. Nuqul bilaash ah Siyaasadda Qaansheegta iyo Lacag Ururinta Cusbitaalka ayaa lagu arki karaa oo laga soo dejisan karaa websaytkayaga parknicollet.com/billing.